



Head Office: Inside the compound of SL MOFA&IC, Presidency road, Hargeisa
Tel: +252 520485 (Office Line), +252 (0) 63 4403392, 63 4081527, 65 9735372
Email: sldiasporaagency@gmail.com www.sldiaspora.org

April 20th, 2022

KU: Guddiyada Jaalliyadaha Somaliland ee Wadamada Caalamka.

UJEEDDO: QABASHADA XUSKA 18 MAY 2022 EE DEBADDA

Asalaama Calaykum, CIID MUBAARAK,

Mudanayaal iyo Marwooyin, Guddiyada & Mutadawaciinta Jaalliyadaha JSL,

Ilaahay baa mahad leh, anigoo ku hadlaya magacayga, kan hawladeennada Xafiiska Qurbajoogga, kagana wakiil ah wareegtadan Wasiirka Arrimaha Debadda & Iskaashiga Caalamiga ah JSL, **Dr. Ciise Kayd Maxamuud Raagsaale**, waxaan marka hore si weyn ugu mahad celinayaa guud ahaan qurbajoogga Jaalliyadaha Somaliland ee daafaha caalamka dareenka wadanimada iyo walaalnimada leh iyo dadaalka muuqda ee aad ka muujiseen gurmada qaran ee masiibadii dabka Suuqa Waaheen iyo waxyeelladii ka soo gaadhay qaranka gubashada xaruntii ganacsiga iyo dhaqaalaha dalka ee Waaheen, Waxaan si weyn u bogaadinyaa doorka Jaalliyadaha wadamada kala duwan ee iskaashiga dhexdooda iyo muxsiniinta walaalaha kaleba xaqiijiyay dhaqaale ururinta **Tabarucaadka Gurmada Suuqa Waaheen**, kuwa soo diray qaadhaankooda, iyo inta badan ee ku gudo jirtaba, waxaan dhiirrigelnaynaa in la xoojiyo, lagana sii wado dhaqaale ururinta wadankasta illaa June, oo soo dirista iyo ururintu is garab socdaan haddii Alle Idmo, loogana faa'iidaysto fursadaha xus qarameedyadan.

Sidoo kale, waxaanu uga mahad celinaynaa, ku bogaadinaynaa, kuna aaminaynaa Qurbajoogga Jaalliyadaha Somaliland ee wadamada badankooda oo isku mar waday illaa bishii Ramadaan ururinta **Tabarucaadka Gurmada Suuqa Waaheen** iyo u diyaar garawga Xuska Sannad Guuraada 31aad, 18 May 2022 ee ka soo wareegtay dib ula soo noqoshada Madaxbanaanida. Tani waa mid marag u ah kaalinta waxku oolka ah ee Qurbajoogga Somaliland ugu jiraan dalka hooyo dhinacyada bulsho-dhaqaale iyo siyaasadaba, waa dhaqanka iyo caadada wanaagsan ee looga bartay hiil iyo hooba inay dadkooda is garab taagaan markasta oo la waajaho marxalado adag oo *isku tashi, isku tiirsi, iskaashi, wadajir iyo midnimo ummadeed gude iyo debadba* lagaga bixi karo laga soo bilaabo taariikhda illaa halgankii. Waxaa iyaduna xusid mudan doorka ay ku lahaayeen Qurbajoogga Somaliland sannadkan Gurmadii Biyo Dhaanka Abaarta weli saamaynteedu jirto deegaanno kala duwan inkastoo Ilaahay mahaddii ay haatan curatay guyaaddii raagtay.

Waxaa kaloo mahad celin ballaadhan naga mudan saaxiibada iyo walaalaha Soomaalida wadamada kale, Itoobiyaanka, Islaamka iyo cidkasta oo innala damqaday oo qaadhaan u ururinta Waaheen kala qaybqaatay Qurbajoogga Somaliland wadamada qaarkood.

Wasaaradda Arrimaha Debadda & Iskaashiga Caalamiga ah JSL waxay ugu baaqaysaa dhammaan Guddiyada Ururada Bulshooyinka Jaalliyadaha Somaliland, Isku Xidhyada, Mutadawaciinta Firfircoon iyo guud ahaan Qurbajoogga Jaalliyadaha Somaliland ee wadamada caalamka iyo Guddiyada Ururada Ardayda Somaliland ee dalalka debada ba in si midaysan, qaranimo iyo xamaasad wadanimo leh loo qabto **Xuska Sannadka Guuraada 31aad ee dib ula soo noqoshada Qaranimada JSL 18 May 2022** ee foodda innagu haya oo sannadkan halkudheg loo qaatay **“Aqoonsi iyo Aayatiin Wacan”** (*Statehood recognition & prosperity*) si waafaqsan Tilmaamaha Guddida heer qaran ee Madaxweynaha JSL **Mudane Muuse Biixi Cabdi** u magacaabay qaban-qaabada 18 May 2022 gaar ahaan qodobada khuseeya Oogista Xuska ee Qurbaha sida hoos ku sheegan.

Qodobada Tilmaamaha Qorshaha Oogista Xuska 18 May 2022 ee Wadamada Debadda:

Wasaaradda Arrimaha Debadda & Iskaashiga Caalamiga ah JSL waxay ku adkaynaysaa dhammaan Guddiyada Qurbajoogga Somaliland ee daadahaynaya Munaasabadaha Xuska 18 May 2022 in la xaqiijiyo, la dabbaqo oo lagu dhaqmo qodobadan hoos ku sheegan oo ahmiyad u leh Weynaynta Xus Qarameedka iyo dadaallada Aqoonsi Raadinta ee Doorka Qurbajoogga JSL:-

1. In dhammaan qurbajoogga reer Somaliland ee ku nool wadamada caalamku ay xubnaha baarlamaanka laga soo doortay degmooyinkooda u qoraan codsiyo ay kaga dalbanayaan inay baarlamaanka dalkaasi horgeeyaan codsiga aqoonsiga JSL;
2. In munaasabadaha wadamada debadda la sii bilaabo inta ka horraysa 18 May 2022;
3. In khudbadaha munaasabadaha Xuska 18 May wadamada debadda lagu jeediyo luuqadaha lagaga hadlo wadamadaas;
4. In lagu soo casuumo munaasabadaha Xuska 18 May dad magac leh oo ka soo jeeda wadanka xusku ka dhacayo, saaxiibada Somaliland iyo dadka kale ee muhiim loo arkaba;
5. In la sii wado dhaqaale ururinta Tabarucaadka Gurmada Suuqa Waaheen.

Sidoo kale, waxaa lagu boorinayaa Jaalliyadaha Qurbajoogga Somaliland inay ka qabtaan bannaan baxyo goobaha muhiimka ah, si xooggan u isticmaalaan warbaahinta warbaahinta qaybaheeda kala duwan, ta maxalliga ah ama heer qaran ee dalalka ay joogaan iyo ta caalamiga ahba, kuna dadaalaan inaan sida ugu habboon uga faa'iidayanno fursadda oogista xus qarameedkan u ololaynta qadiyadda madaxbanaanida JSL iyo in farriinta doonista shacabka Somaliland ee aqoonsi caalami ahi ay meel fog gaadho.

Allaa Mahad Leh

Sacad Maxamed Cabdi
Agaasimaha Xafiiska Qurbajoogga